XAMEYTIDA (Gall-bladder)

Qoraa: Mohamed Ibrahim, MD

Maxay tahay:

Xamaytida waxay ka mid tahay habdhiska dheef-shiidka. Waxay ku dhagentahay ayna hoosta kaga taalaa beerka. Xameytida waxaa loo abuuray in ay dheecaan kaydiso. Waa haan ama boorso wax la mid ah. Waxay keydisaa dheecaanka English lagu yiraahdo **bile** oo ah mid midab cagaaran leh oo uu beerku sameeyo si joogto ah. Tubo ayaa isku xirta beerka, xameytida iyo mindhicirka yar.

Tubada guud ee kasoo baxda beerka kuna shubta mindhicirka dhecaanka **bile**-ka English waxaa lagu dhahaa **bile duct**. Tubada xameytida ku xirta tubada guud ee bayl-ka waxaa loo yaqaanaa **cystic duct.** Inkastoo ay xameytidu keydiso bayl-ka hadana keydinteeda muhiim weyn uma aha jirka oo hadii la jaro xameytidu howshu sidii hore ayay u sii soconaysaa oo tubada guud ee baylka ayaa wadaysa. Sawirradan labada baal ee soo socda ayaad ka arki kartaa sida ay u kala yaalaan ayna isugu xiran yihiin.

Tubada guud ee baylka inta aysan ku xirmin mindhicirka yar wayaa kusoo darsama tubada dhecaanka kasoo qaada ganaca oo English loogu yaqaano **pancreas**. Mararka qaarkood dhagax ka yimid xameytida ayaa xaniba socodka dhecaanka ganaca halkaas oo uu dhib kaga soo gaaro. Hoos ayaan ku sharxi doonaa arrintan.

Sawir kutusaya xameytida meesha ay jirka guud kaga taal



- Sawir kutusaya xameytida iyo tubooyinka ku xiran sida ay jirka isugu xiran yihiin



Maxaa keena:

Xamytida howsheeda waa iyadoo kaydisa **bile**-ka oo markuu qofku cunto cuno kusoo sii dayso mindhicirka si ay bile-ka ugu qaybqaadato dheef-shiidka. Bile-ka la'aanteed aadbay udhib badan tahay in la shiido ama la burburiyo cuntada saliida leh. Hase ahaatee keydinta bile-ka inta badan waxay keentaa in ay isku badasho dhagax. Markay dhagaxaan ku samaysmaan xamaytida waxaa English lagu dhahaa **cholelithiasis**. Dhagaxaantaas iyaga sidooda dhib maleh balse waxay dhibkeenaan markay tubada bile-ka kasoo qaadaysa xamaytida xanibaan oo ay dabool ahaaan u noqdaan. Taas waxay keenaysaa in bile-kii uu halkaa ku xanibato oo xanuun keento. Waxaaba ka daran iyadoo isku badasha **infection** ama hurgun hadii ay bile-ka mudo xanibanto oo bacteria ku abuuranto. Xanuunka aan hurgunta lahayn waxaa loo qayaan English **biliary colic**, balse mar hadii uu isku badelo hurgun waxaa loo yaqaan **cholecystitis.** Waxaa muhiim ah in aan la hilmaamin xaqiiqada ah in dad badan ay qabaan dhagaxaanta xameytida balse aysan wax dhib ah kala kulmin. Dadka qaarkood uunbuu dhibkaa u keenaa.

Astaamaha:

Xanuunka xameytida waxuu ka yimaadaa saan kor ku sheegay marka bile-ka socodkeedii la xanibo oo ay kasoo bixi weydo xameytida, taasoo inta badan uu keeno dhagax. Astaanta ugu weyn waa bog xanuun ama laab-jeex qofka ku yimaada markuu cunto cuno, qaasatan mid kubadan saliida. Xanuunkaas inta badan waxuu ka bilowdaa naaska midig hoostiisa isagoo u gudbaya dhabarka danbe. Xanuunkaas waa mid kaca hadana degga sida hirarka. Hadii uu xanuunka sii bato waxaa laga yaabaa in uu qofku matago. Dabcan qof waliba isku si xanuun uma qabto oo xanuunyada qaar ayaa laga yaabaa in ay sidan ka duwanaadaan. Xanuunka dhagaxa keeno hadii uu sii bato oo uu isu bedelo kan hurgunka waxaa kusii darsamaya qandho, xanuunkii oo joogto noqdo, iyo astaanta ugu danbeysa oo laga yaabo in uu qofku miyirkaba iska bedelo. Qofka hurgunka ku dhaco marka dhiiga laga baaro waxyaalaha laga heli karo waxaa ka mid ah dhiiga cad oo sare u kaca iyo **bilirubin**-ka oo dhiiga meel sare ka gaara.

Dhagaxa meelaha kale ee uu xanibikaro hadii uu kasoo baxsado xameytida waxaa ka mid ah tubada guud ee qaada **bile**-ka oo loo yaqaan **common bile duct**. Waxaa kaloo uu xanibi karaa tubada dheecaanka ka qaado ganaca (**pancreas**) taas oo sababaysa in astaama kusii saa'idan bartamaha caloosha xanuun ku yimaada iyo marka dhiiga laga baaro **enzyme**-ka ganaca oo kordha.

Daaweynta:

Hadii ay astaamaha ku egyihiin xanuunka dhagaxa oo kaliya (**cholelithiasis**) inta badan dadka waa laga qalaa kulamaa uu xanuunka kusoo noq-noqonayo. Balse qofka hadii uu rabo waa iska sugi karaa oo arki karaa bal hadii uu kasii darayo ama fiicnaanayo. Dabcan daawooyinka xanuunka ayay noqonaysaa in qofka loo qoro si markuu xanuunku yimaada loo qaato. Balse mar hadii uu gaaro hurgunka xameytida (**cholecystitis**) waa qasab in qaliin la sameeyo oo xameytida meesha laga saaro iyadoo antibiyootik qofka la siinayo. Laba si ayaa xameytida loo qalaa. Qaliinka yar ee kaamerada loo isticmaalo oo English lagu dhaho **laparoscopic cholecystectomy** iyo midka asaligii hore ee furan. Boqolkiiba in ka badan sagaashan wadamada horay umaray waxaa qaliinka xameytida loo sameeyaa sida fudud ee kaamerada. Marka keliya ee sidii hore ee furan loo sameeyo waa markii ay adkaato in sida kaamerada loo sameeyo. Bal hoostan ka eeg sida ay u kala duwan yihiin sawiradan aan ku lifaaqay.

Habka qaliinka kaamerada faa'iidadeedu aad bay u weyn tahay oo ay ka midtahay iyadoo uu qofku si deg-deg ah cusbitaalka ugu bixi karo, xanuunkii qaliinka oo aad u yar, iwm.
Hadii sida kaamerada loo sameeyo qofkii laga qalay dhagax awgii oo kaliya inta badan isla maalintaa ayuu gurigiisa u noqdaa. Balse hadii loo qalay markuu gaaray hurgudka waxay u badan tahay in uu qofkaa ku jiro cusbitaalka dhowr maalmood. Tan nidaamkii hore ee furan waaba ka daran yahay oo qofku waxay qasab ku tahay in uu cusbitaalka joogo isbuuc wax la mid ah ama kaba dheer.

Labada si ee qaliinka xameytida oo laysku bar-bar dhigay



Qof laga qalay xameytida habka kaamerada

Maxaa ka jira:

Halkan waxaan isku dayeyaa in aan ka hadlo warar suuqa lays-kugu jiro inta isoo gaartay.

- **Dhagaxaanta Somalida way ku beermaan maadaama ay biyo xun cabaan**: Tani waxba kama jiraan. Dadkoo dhan dhagaxa waa ku beermi karaa, biyaha qofka uu cabona waxba kama gelin. Dadka qaar dhagaxa dhib ayuu u keenaa dadna way iskala nool yihiin oo wax dhib ah kuma keeno.

- **Hadii lagaa qalo hilibka iyo wixii la mid ah ma cuni kartid:** Run ma aha. Inkastoo ay cuntada saliida ku badan ay u badan tahay in ay ku dhibto hadana waa mudo gaaban oo kulamaa aad ka soo bogsato qaliinka jirkaadana uu u barto xameytida oo ka maqan sidii caadiga kuu ahayd ayaad noqonaysaa.

- **Dhiig kar iyo kaadi sokorow ayay keentaa qaliinkeeda:** Ma aqaan meesha ay sal kuleedahay hadalkan qaldan, balse waxba kama jiraan.
- **Caloosha ayaa lagaa dal-daloonin marka lagu qalayo:** Qaliinka kaamerida aadbuu ugu sahlan yahay kana fiican yahay kan furan. Dalooliska jirka maqaarkiisa ayaa la sameynayaa si kaamerada loo geliyo. Qaliinka weyn ee furan kan daloolka kaamerada ee aadka u yaryar ayaa la qaataa.

OGAYSIIS (DISCLAIMER):

Casharkaas iyo warbaahintaas kor ku xusun looguma talagelin in lagu sheybaaro ama daweeyo shaqsi. Fadlan la xiriir dhaqtarkaada hadii ay astaamo ku hayaan.
The above statements are not to diagnose and treat any individual. If you find suffering from any of the above symptoms please consult your doctor.

© SomaliMedicalCharity.org